

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #15

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

Qorsheyaasha Xakamaynta Cayayaanka

OAR 333-150-0000,
CUTUBKA 6-202.15

(E) Faqradda (D) ee qaybta 6-202.15 ma khusayso:
(1) Haddii cayayaanka duula ama cayayaanka kale aysan joogin ayada oo ay sabab u tahay goobta ay ku taalo goobta cuntadu, cimiladu, ama xaalad kale oo ka hor istaagaysa; oo
(2) Goobta cuntaduna samaysato qorshe ay cayayaanka ku maaraynayso si ay u xakamayso joogitaanka cayayaanka duula ama cayayaanka kale. Qorshaha maareynta cayayaanka waa in ay meelmarisaa wakaaladda maamulka kahor inta aan la dhaqan galin. ^{PT}

SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:


Xayawaanku waxay sidaan nooleyaal cuduro sababa waxayna jeermisyo u gudbin karaan bi-ni'aadanka ayaka oo adeegsanaya wasakhayn toos ah iyo dadbanba oo ku dhacda cuntada iyo oo-gooyinka cuntadu taabanayso. Xayawaanku waxay dhigi karaan wasakh dareere ama saxaro ah, taasoo abuuraysa baahi loo qabo feejignaan ku saabsan la socobda howlaha xayawaanka iyo feejignaan ku saabsan nadiifin adag oo joogto ah. Meelaha wax lagu cuno ee kor ka banaan waxay sare u qaadaan suurtagalmimada in xayawaanka iyo cayayaanku soo galaan goobta. Qorshe cayayaanka lagu xakamaynayo oo hanaano gaar ah leh kaasoo ku saabsan sida loola socdo loogana jawaabo howl kasta oo xayawaanka/cayayaanka ka imaanaysa waa muhiim si loo yareeyo wasakhowga cuntada. Qorshaha waa in uu kujiro qof loogu tala galay wakhti cayiman in uu la socdo uuna qiimeeyo meesha wax lagu cuno, goobaha diyaarinta cuntada iyo kaydka cuntada si uu ula socdo howlaha xayawaanka ama cayayaanka ee gudaha goobta. Ka reebidda in xayawaanku/cayayaanku soo glaan goobta ayaa ah mid kamid ah qodobada lagama maarmaanka ah ee looga hortagi karo wasakhowga cuntada iyo cudurada cuntada ka dhasha in ay ka dhacaan goobtaada.

Goobaha wax lagu cuno ee kor ka banaan waxay badan yihiin inta lagu jiro bilaha diirran. Waayihii hore waxay ku koobnaayeen fadhida banaanka ah ee marshabiyeediyada iyo barxadaha; si kastaba ha noqotee, qaar kamid ah maqaaxiyaha waxay samaysteen daaqado balaaran iyo darbiyo oo banaan loo furi karo. Ayada oo laga yaabo in arintaanu ay tahay mid ay macaamiishu aad u yaqaanaan, waxay qofka ku shaqaynaya u keenaysaa khatar kaga imaan karta cayayaanka taasoo xili uun noqon doonta mid dhab ah. Xeerka Fayadhawrka Cuntada Oregon 6-202.15 wuxuu ogolaa-nayaa albaabada banaanka ah ee ay difaacayaan dhalooyinka ama mishi-inada hawada ka nadiifiya cayayaanka si looga hortago cayayaanka duula, kuwa adimada ku socda, shinbiraha iyo cayayaanka kale in ay gudaha soo galaan. Goobaha adeegyada cuntadu waxay bixin karaan cunta cunis meel kor ka banaan ah ayada oo la adeegsanayo meelo banaan oo aan difaac lahayn haddii goobtu leedahay qorshe cayayaanka lagu xakamaynayo oo ay meelmarisay waaxda caafimaadka guduho cayayaan iyo xayawaanada yaryarna aysan goobta joogin. Marka cayayaan laga helo goobta, qofka ku shaqaynaya waa in uu awood u yeeshaa xirista dhammaan duleelada banaanka talaabana ka qaadaa si uu u ciribtiro cayayaanka iyo cunta kasta oo wasakhowday. Qofka ku shaqaynaya wuxuu sidoo kale u baahan doonaa in uu awood u leeyahay in uu nadiifiyo uuna jeermiska ka dilo maacuun, qalab, iyo oogooyinka cuntadu taabato oo kasta oo kale oo wasakhoobay.

Maadaama aad tahay qofka ku shaqaynaya waa mas'uuliyaddaada in aad goobtaada cayayaanka ka ilaalisoo. Marka aad dhibaato la kulanto, waa mas'uuliyad ku saaran in aad si dhakhso ah u xalisoo. Ha sugin kormeeraha caafimaadka in uu ogaado dhi-baatada cayayaanka.

Marka aad samaynayso Qorshaha Xakamaynta Cayayaanka, waa in aad ka fakartaa:

- Qaabka aad cuntada u ilaalinayso marka la diyaarinayo?
- Ilaa intee jeer ayaad ka qiimaynaysaa dhammaan goobaha cuntada lagu diyaariyo iyo goobaha cuntada lagu kaydiyo hawlaha cayayaanka?
- Waa maxay nooca jadwalka nadaafadda ee aad la imaanayso si looga hortago in waxyaabaha cuntada kasoo hara ku aruuraan goobta oo dhan?
- Maxaad samaynaysaa marka cayayaanka duulaya, shinbiraha ama



Fly swatters MA AHAN Qorshe Xakamaynta Cayayaan oo la meelmarisay!

jiirku ay soo galaan goobta?

- Qaabkee ayaad goobta kaga baaraysaa cayayaanka imisa jeer baadse ka baaraysaa?
- Yaad wacaysaa si loo ciribtiro dhi-baatada?

Wixii macluumaad dheeraad ah, bookho websaytka EPA: <http://www.epa.gov/pesticides/factsheets/ipm.htm>.